Daryeelka Carruurta Ee Qoyska	**Hagaha Kaqaybqaataha** **Kormeerka Firfircoon: Daryeelka Nafta iyo Sirta ee Bixiyaha**
Qaybtan labada saacadood ah waxay buuxinaysaa shuruuda tababarka Xeerka 2 ee tababarka kormeerka. **La Cusboonaysiiyay 2/2024**	**2 Saacadood**

Xuquuqda lahaanshaha iyo Xadidnaanta Isticmaalka iyo Mas'uuliyadaha Ka Dhalanaya

Manhajkaan waxaa lagu diyaariyay maalgalin ay bixisay Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota. Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota wax wakiil ah kama ahan wax mas'uuliyad ahna kama saarna isticmaalkiisa ama natiijadiisa. Manhajkaan dib looma soo saari karo, lama koobin karo, lama iibin karo ama si kale looma qaybin karo ayada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota.

Si aad u codsato oggolaansho qoraal ah oo ku saabsan isticmaalka ama dib usoo saarista qayb kamid ah manhajkaan, iimayl u dir:
DHS.Child.Care@state.mn.us

Guudmarka Casharka

Knowledge and Competency Framework (KCF, Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida) ee Minnesota ee Aagga Mowduuca Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore, Aagga Maadada Child Development Associate (CDA, Isku Xirka Horumarinta Carruurta)

Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida (KCF) ee Minnesota ee Aagaga Mowduuca Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore iyo Aagaga Maadada Isku Xirka Horumarinta Carruurta (CDA) waxay halkan ugu qoran yihiin si ay uga caawiyaan ka qaybgalayaasha inay fahmaan kartida, nuxurka, iyo maadooyinka looga hadlayo tababarka.

Qaybta Nuxurka KCF: VII.B. Xaqiijinta Badbaadada
Aagga Maadada CDA: Qorshaynta deegaan waxbarasho oo badbaado ah, oo caafimaad qaba.

Ujeedooyinka Waxbarashada:
Dhammaadka tababarkan, kaqaybgalayaashu waxay awoodi doonaan inay:

- Qeex heerarka ruqsad bixinta ee Xeerka 2 aad ee Minnesota Department of Human Services (MN DHS, Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota) ee ku aadan kormeerka goobaha daryeelka carruurta ee qoyska.
- Aqoonsadaan saameynada caafimaadka dhimirka iyo faya qabka daryeel bixiyuhu ku leeyihiin kormeerka iyo isdhexgalka lala sameeyo carruurta.
- Aqoonsadaan xeeladaha saxda ah ee daryeelka nafta iyo sirta ee kor u qaadaaya kormeerka iyo badqabka waxtarka leh ee daryeelka carruurta.

Ujeedooyinka Waxbarashada waa in dib loogu eegaa bilowga kulan kasta oo lagu dadaalo in la isku xiro nuxurka iyo jawaabaha ka qaybqaataha dib loogu noqdo ujeedooyinka kulanka.

Guudmarka Casharka

Wakhtiga Qaybta	Fikradaha Muhiimka Ah	Xeeladaha Waxbaridda
15 daqiiqo	Soo Dhawaynta/Hordhacyada Dib-u-eegista ujeedooyinka	Hal Abuurka Kooxda Ballaaran Dooda Kooxda Yar
30 daqiiqo	Saameynada Caafimaadka Dhimirka ee Daryeel bixiyuhu ku leedahay Kobaca Carruurta	Milicsiga shakhsi ahaaneed Shaqada Gaarka ah Lammaanin iyo Wax wadaagis
20 daqiiqo	Caafimaadka iyo Faya-dhawrka Bixiyaha	Dooda Kooxda Ballaaran Howl koox ballaaran
30 daqiiqo	Baahiyaha Sirta iyo Shuruudaha sirta xogta	Dooda Kooxda Ballaaran Hawsha Koox Yar
15 daqiiqo	Xaaladaha Degdegga Ah	Khudbo yar Howl koox ballaaran
10 daqiiqo	Dib-u-eegista Ujeedooyinka/ Soo Xirista	Dib u Eegista Higsiyada Hawsha Dib U milicsiga Gaarka ah
Wadarta Guud ee Wakhtiga: 2 saacadood		

Supervision Definitions

MN Rule 2 for Family Child Care	Best Practice: Caring for our Children
Minnesota DHS Rule 2 (9502.0315, subp. 29a) defines supervision as: "Supervision" means a caregiver being **within sight or hearing** of an infant, toddler, or preschooler at all times so that the caregiver is capable of intervening to protect the health and safety of the child. For the school age child, it means a caregiver being available for assistance and care so that the child's health and safety is protected."	**Caring for our Children: National Performance and Safety Standards** defines best practice: "Caregivers/teachers should provide active and positive supervision of infants, toddlers, preschoolers, and school-aged children by sight **and** hearing at all times, including when children are resting or sleeping, eating, being diapered, or using the bathroom (as age appropriate) and when children are outdoors.

Xeeladaha xalinta caqabadaha ee Maareynta Xaaladaha Qalafsan:

1. Aqoonso caqabada
2. Aqoonso xaaladaha kale ee ay ku jiri karaan:
    - Isbadel ku dhaca jadwalka daryeelka carruurta.
    - Isbadel ku dhaca goobta daryeelka carruurta.
    - Isbadel ku dhaca habdhaqanka, ficilada, iyo falcelinnada bixiyaha daryeelka carruurta.
    - Isbadelka xeerka ama farsamada.
3. Tijaabada iyo Cilada: Dooro xalka oo tijaabi. Haddii aan xalkaani shaqeyn, dooro mid kale, oo iskuday markale.
4. Haddii tallo ama fikir cusub loo baahdo, wac, ama la kulan saaxiib shaqo ama tababare aad ku kalsoon tahay.

Qaababka loo joogteeyo faya qabka jirka iyo dhimirka loona yareeyo walaaca:

-
-
-
-

Qaybta I:Xeeladaha Maareynta Xaaladaha Qalafsan

Waa maxay dhibaatadu? Aqoonsiga caqabada ama isha walaaca:	**Sidee ayay tani ku dareensiinaysaa jir ahaan ama shucuur ahaan?**	**Farsamada yareynta Walaaca: Aqoonso jawaabaha dejinta leh si aad u adeegsato inta lagu jiro xiliyada qalafsan oo u diyaarinaaya maskaxdaada xal ka gaarista dhibaatada.**
Qoys ayaa si joogto ah uga soo daaha wakhtiga qaadista ilmaha.	Niyad jabsan: Waan kasoo daahay ciyaarta ilmahayga. Mashquulsan: qoyska ayaan raacayn xeerka daryeelka carruurta.	Waxaan samayn doonaa neefsiga qotoda dheer muddo dhawr daqiiqo ah ilaa aan ka dareemo niyad wanaag iyo daganaan. Waan iska ilaalin doonaa xanaaqa ama niyad jabka waayo ilmaha ayaa wali ila jooga wuxuuna daawanayaa falcelinta aan ka bixiyo walaaca. Inkasta oo aan niyad jabsanahay, waan ogahay in isdejintu iga caawinayso xal u helidda ciladaan igala dhexaysa qoyska iyo inaan ilaaliyo xirfad yahannimada.

Qaybta II: Xeeladaha Maareynta Xaaladaha Qalafsan

Dhibaato ama Caqabad	**Xalalka Imaan kara**
Qoys ayaa si joogto ah uga soo daaha wakhtiga qaadista ilmaha.	1. Sii wad inaad u ogolaato kasoo daahista qaadista. 2. Tixraac xeerkayga. Wuxuu xeerku ka sheegayaa kasoo daahida wakhtiga qaadista ilmaha? Haddii loo baahdo, badel xeerka si aad ugu qeexdo kasoo daahida wakhtida qaadista ilmaha si qeexan mustaqbalka 3. Shir la qaado qoyska si aad ugala hadasho ka soo daahidda qaadista ilmaha, la wadaag filashooyinka xeerka, oo u daa qoyska inay go'aasadaan haddii ay raaci karaan xeerka ama u baahan yihiin inay helaan qorsheyaal kale oo daryeelka carruurta ah.

Abuurista Xeerka Arimaha Shaqsiga

Xeerka arimaha shaqsiga ah ayaa u sheegaaya qoysaska dedaalka bixiyaha daryeelka caruurtu gelinaayo ilaalinta sirta iyo xushmaynta xaqa qoyska ee sirta xogta. Xeerkaan, bixiyaasha daryeelka carruurta ayaa sheegaaya sida xogta la xiriira ilmahooda ama qoyska loo wadaagi karo ama loo arki karo ayadoo qayb ka ah shaqada caadiga ah ee barnaamijka. Xeerkaan waxaa ku jira ogolaanshaha saxiixan ee ka yimid qoyska ee adeegsigaan. Tixgeli:

- Qaabka iyo meelaha magacyada loo adeegsanaayo lagana arki karo goobta daryeelka carruurta ama wargeysyada, ababka, iyo bogaga baraka bulshada.
- Qaabka iyo meelaha sawirada iyo muuqaallada carruurta lagu kaydinaayo. Ku dar bayaanka u sheegaaya qoysaska inaysan wadaagin sawirada ama muuqaallada ilmaha aan ahayn kuwooda ee ay kasoo xigtaan ilaha kale.
- Sida kaamirooyinka amaanka iyo kormeerada loogu adeegsan doono daryeelka carruurta.
- Adeegsiga bogaga baraha bulshada ama ababka daryeelka carruurta oo loo adeegsado daryeelka carruurta.
- Sida iimeylada iyo fariin qoraallada kooxda loo diro (tusaale, adeegsiga nuqullada aqoonsiga laga reebay si looga fogaado faafhinta xogta xiriirka qoysaska).

Hoos ku qor Xeerka Arimaha Shaqsiga ee barnaamijkaaga daryeelka carruurta:

Yoolalka Xirfadda:

1.

2.

3. Qorsheyaasha Daryeelka Nafta -

Ilaha

Khayraadka Caafimaadka Dhimirka

- Maareynta Dhibaatada
- Laynka Gurmadka ee MN
- Laynka Gudmadka Isdilka iyo Masiibada 988
- Fast Tracker MN

Dhaqamada Daryeelka Nafta

- Maareynta Walaaca ee Mayo Clinic
- Farsamooyinka nasiinada ee Daawaynta Walaaca

Liinkiyada Shati-bixinta iyo Qawaaniinta

- Xeer 2 ee MN ee Daryeelka Carruurta ee Qoyska
- Qawaaniinta Minnesota, Cutubka 142B – Xeerka Shati-siinta Adeegyada Aadanaha
- Shuruudaha daryeel bixiyaasha kaydka beddelka ah iyo kuwa beddelka degdegga ah ee daryeelka carruurta ee qoyska

Ilo Xirfadeed oo Dheeraad ah

- Caring for Our Children: Heerarka Waxqabadka Caafimaadka iyo Badbaadada ee Qaranka, Tilmaamaha Barnaamijyada Daryeelka iyo Waxbarashada Carruurta
- Xeerka Anshaxa ee National Association for the Education of Young Children (NAEYC, Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta Yaryar) iyo Bayaanka Ballanqaadka
- Sharciga Hawada Nadiifta ah ee Gudaha Daryeelka Carruurta ee Qoyska